

# SIDA CAAWIMAAD LAGU HELO

- Kadalbo macluumaad iyo khayraadka kusaabsan caqabadaada dhanka sharciga kana codso caawimaad barta <https://vtlawhelp.org>
- Wac layneena caawimaada, oo ay maamulaan iskaashataadeena, Legal Services Vermont, kana wac: 1-800-889-2047

Burlington | Montpelier | Rutland  
Springfield | St. Johnsbury

Shaqada bixisay aasaasiyaadka daabacaadaan waxaa lagu xoojiyay maalgalin katimid deeqda Waaxda Guriyaynta iyo Hormarinta Magaalada ee Maraykanka (U.S. Department of Housing and Urban Development). Waxyaabah iyo natijjadi kaasoo baxda shaqadaba waxaa loosoo bandhigayaa bulshada. Qoraaga iyo daabacaha ayaa kaligood kamasuul ah saxnaanta bayaanada iyo turjumaadyada kujira daabacaadaan. Turjumaadyada noocaas ah qasab maaha inay matalaan fikradaha Dawlada Federaalka.



## MA UBAAHANTAHAY TURJUMAAN?

احصل على مساعدتنا بلغتك بالاتصال على  
1-800-889-2047  
اخبرنا باسمك ورقم هاتفك ثم انطق العربية.

Reciba nuestra ayuda en su idioma. Llame al 1-800-889-2047.  
Díganos su nombre y número de teléfono. Diga español.

သင့်ဘာသာစကားဖြင့် ကျန်းတို့ထံမှ  
အကွဲအညီရပျောပါ။ 1.800.889.2047 ကိုခေါ်ဆိုပါ။  
သင့်နာမည်နှင့် ဖုန်းနံပါတ်တို့ကို ပြောပါ။ မြန်မာ(မဲမာ)  
ကိုပြောဆုံးပါ။

Obtenez de l'aide de nous dans votre langue. Appelez  
1.800.889.2047. Dites-nous votre nom et votre numéro de  
téléphone. Dites français.

हामीबाट आपने भाषामा सहयोग प्राप्त गर्नुहोस्।  
1.800.889.2047 मा कल गर्नुहोस्। हामीलाई तपाईंको  
नाम र फोन नम्बर भन्नुहोस्। भाषा नेपाली भन्नुहोस्।

Caawimo nooga hel anaga luqaddaada. Soo wac 1-800-889-2047. Noo sheeg magacaaga iyo lambarka telefoonka. Dheh Soomaali. Equis quamenisi doloreperit dolut. Tem restiis as simagni occurs.

Pata usaidizi kutoka kwetu kwa lugha yako. Piga simu nambari 1-800-889-2047. Tuambie jina na nambari yako ya simu. Sema Kiswahili

Để nhận sự trợ giúp của chúng tôi bằng ngôn ngữ của quý vị.  
Gọi số 1-800-889-2047. Vui lòng cho chúng tôi biết tên và số  
điện thoại của quý vị. Vui lòng nói "Tiếng Việt".



**VERMONT  
LEGAL  
AID**  
**WORKING TOGETHER FOR JUSTICE**



## MASHRUUCA SHARCIGA TAKOORKA GURIYAYNTA

Adeegyo sharci oo lacag la'aan ah ayaa  
lasiinayaa dadka reer Vermont (Vermonters)  
ee waajahaaya takoorka dhanka guriyaynta ah

<https://vtlawhelp.org> | 1-800-889-2047

# SIDA AAN KUU CAAWINAYNO

## Baaritaan

Waxaan baarnaa falalka takoorka waxaana udoodnaa adeegyada guriyaynta oo loosiman yahay ee dhinacyada kirada, iibsiga, hooyyada, iyo qorshynta adeegsiga dhulka.

## Baaritaanka Guriyaynta oo Cadaalad ah

Waxaan samaynaa baaritaanka guriyaynta oo cadaalad ah si aan u ogaano in mulkiilayaasha Vermont, dadka dhulka wakiilada ka ah, iyo qolyaha kale ay kudhaqmayaan shariyada guriyaynta.

## Talo iyo Wakiil kanoqosho

Waxaan kalatalinaa dadka reer Vermonters xaqquqda madaniga ah ee guriyaynta iyo ikhtiyaaradooda ay haystaan. Waxaan matalnaa dadka xaqquqdooda madaniga ah lagu xad gudbay.

## Wacyi Galinta Bulshada

Waxaan barnaa dadka kiraystayaasha ah, mulkiilayasha, adeeg bixiyaasha guriyaynta, xeer sameeyaasha, saraakiisha, iyo bulsho waynta takoorka kajira gobalka Vermont.

## Udoodida Xeerkha

Waxaan matalnaa masaaliixda dadka reer Vermonters anagoo kumatalna baarlamaanka gobalka, wakaaladaha gobalka, iyo qorsho sameeyaasha heer magaal iyo her gobal si wax looga qabto arimaha nidaam ahaan iyo haayad ahaanba abuuraaya takoorka guriyaynta kajira.



## YAAN NAHAY

**Vermont Legal Aid** waa shirkad gobalka oo dhan kajirta, oo samofal ah oo dhanka sharciga qaabilsan oo kashaqaysa cadaalada bulshada. Waxaan adeegyo sharci oo lacag la'an ah oo aan sinaa dadka reer Vermonters ka ah oo waajahaaya dhibaatooyinka dhanka sharciga oo caqabada ku ah xaqquqahooda iyo faya dhawrkooda.

**Barnaamijkeena Mashruuca Sharciga Takoorka Dhanka Guriyaynta (Housing Discrimination Law Project, HDLP)** Wuxuu caawinayaad reer Vermonters ka ah ee xaqquqdooda guriyaynta aan la siinin. Mashruuca HDLP wuxuu sidoo kale sameeyaa baaritaano iyo shaqooyin lagu difaacaayo xaqquqda dadka reer Vermonters ee ah inay kunoolaadaan meeshay doortaan.

*"Waad kumahadsan tiihin caawimaada aad iga siiseen inaad helo guri amaan ah intaan raadinaayay daryeel caafimaad in la iga siijo xanuunka HIV ga iyo MS. Caawimaadiina la'aanteed, maanan heleen waqtiga dheeriga ah ee aan sida wayn ugu baahnaa. Waxaanu aad kaaga mahadcelinaya caawimaadiina."*

- Macmiilka HDLP

## CIDA AAN CAAWINO

Waxaan kacaawin karnaa qof kasta oo reer Vermonters ah oo la kulmay takoorto loogaystay. Uma baahnid inaad buuxiso wax shuruudo dhaqaale ama hanti ah.

Takoorka dadka loogu gaysto adeegyada guriyayntu waa sharci daro, hadayna kusalaysan tahay sabab laxariirta:

- Isirkaaga, Midabkaaga
- Wadanka aad Udhalatay, Qoomiyadaada
- Diintaada
- Naafadaada
- Inaad Ilmo Yaryar Haysato
- Noocaaga galmo, Jinsigaaga
- Dookhaaga Galmada
- Da'daada
- Xaaladaada Guur
- Inaad Hesho Caawimaada Dawlada



VERMONT  
LEGAL  
AID

Mashruuca Sharciga Takoorka Guriyaynta